National Institute for Public Health
and the Environment
Ministry of Health, Welfare and Sport

Baaritaanka Qaaxada *(TB)* ee ah raajitada xabadka

Macluumaad ku saabsan baaritaanka Qaaxada (TB) ee ah raajitada xabadka

Raajitada xabadka (ee sambabada) waxay aqoonsan kartaa waxyeelooyinka. Waxyeelada lagu ogaado raajitada waxay ka dhignaan karaa inaad qabto cudurka qaaxada (TB). Xaashidaan waxaa ku qoran xog dheeraad ah oo ku saabsan baaritaanka raajitada xabadka.

Waa maxay cudurka qaaxada?

Cudurka qaaxada (TB) waa cudur aad u daran, oo ay sababtay bakteeriyadu. Cudurka wuxuu caadiyan saameeyaa sambabada (qaaxada sambabada). Qofka qaba qaaxada sambaba wuxuu cudurka qaadsiin karaa dadka kale asagoo ugu gudbinaaya hawada. Ayadoo qofku uu cudurku ku gaaraayo tusaale ahaan qufac ama hindhiso. Astaamaha muujin kara cudurka qaaxada waxaa kamid ah qufac, culeyska jirka oo hoos u dhaca, xumad aad u sareysa (qandho) iyo dhidid habbeynkii yimaada. Dadka qaar kamid ah waxay muujiyaan astaamo khafiif ah ama maba muujiyaan astaamo gabi ahaanba. Sidaas oowgeed waxaa laga yabaa inaad qabto cudurka adoon astaamo lahayn.

Waxa ay tahay inaad ka ogaato raajitada

Baaritaankaan waa badqab. Sidoo kale waxaa loogu talagalay carruurta iyo dumarka uurka leh. Waa muhiim inaad sameyso baaritaanka. Waxay muhiim u tahay caafimaadkaaga iyo caafimaadka dadka kuu dhaw.

Maxay tahay inaad sameyso raajitada kahor?

- Iska saar dahab kasta ood xiran tahay (tusaale, qoor gashi, kan marada lagu dhejiyo ama dahabka dhagaha la gashto).
- Xir timaha dhaadheer. Caadiyan lagaama doonaayo inaad bixiso xijaabka.
- Caadiyan waxaa lagu waydiin doonaa inaad iska bixiso marada dhexda kuugu xiran.

Maxay tahay inaad sameyso raajitada kahor?

Iska saar dahab kasta ood xiran tahay

Xir timaha dhaadheer

Ma ahan inaad iska bixiso xijaabka

Caadiyan iska bixi marada dhexda

Maxaa dhacaaya marka raajitada lagaa qaadaayo?

- Waxaad istaagi doontaa kaamirada horteeda. Kalkaaliyaha ayaa kaa caawin doona inaad si quman u istaagto.
- Kalkaaliyaha wuxuu ku waydiin doonaa inaad qaadato neef meel dheer ah aadna isku celiso dhowr sikin. Taasi waa marka la qaadaayo raajitada.
- Kalkaaliyuhu wuxuu eegi doonaa in raajitada si sax ah loo qaaday. Haddii aan si sax ah loo qaadin, waxaa lagaa qaadi doonaa raajito cusub.

Si quman u istaag kaamirada horteeda



Maxaa dhacaaya marka raajitada la qaado?

- Laanta Adeega Caafimaadka Dadwaynaha (GGD) gaar ahaan dakhtarka qaaxada ayaa qiimeyn ku sameyn doona raajitadaada muddo dhowr maalmood ah.
- GGD ayaa kula soo xariiri doona haddii baaritaanka raajitadaada sheegto inaad u baahan tahay baaritaan dheeraad ah. Taasi micnaheedu ma ahan inaad qabto cudurka qaaxada. Waxaa jiri kara arrimo kale oo sababi kara waxyeelooyinka lagu arkay raajitada. Waa wax adiga muhiim kuu ah inaad sameyso baaritaan dheeraad ah sida ugu dhaqsiyaha badan. Sidaas darteed haddii GGD kugu casuunto inaad qabsato balan kale, waa muhiim inaad balanta tagto.
- Caadiyan lagulama soo xariiri doono haddii wax dhibaatooyin ah aan lagu arkin raajitada.
- Haddii aad haysato daawada cudurka qaaxada oo bilaabanaysa isla markiiba. Haddii ay muhiim tahay, GGD wuxuu dadka aad xiriirka la sameysay ka baari doonaa qaaxada ama caabuqa qaaxada (TB). Dakhtarka kahortaga qaaxada GGD ayaa u sheegi doonaa dakhtarka qoyskaaga haddii lagaa helo qaaxada (ama xanuun kasta oo kale).

Raajadu waa “sawir” laga qaadaayo xaalada markaas jirta. Haddii muddo kadib aad isku aragto astaamo muujin kara inaad qabto qaaxada. sida qufac, culeyska jirka oo yaraada, qandho ama dhidid habbeynkii yimaada, markaas mar walba la xariir dakhtarka qoyskaaga. Xataa haddii mar dhow lagaa qaaday baaritaanka. Sidoo kale waxaad la xariiri kartaa waaxda kahortaga cudurka qaaxada ee GGD ee deegaankaaga.

Maxaan ku sameynaynaa xogtaada?

GGD waxay xogtaada gaarka ah ee ay haysto kuna jira faylka caafimaadka u kaydisaa qaab waafaqsan sharciyada qaanuunka degsan.

Ma qabtaa wax su’aalo, tallooyin, walaacyo ama bogaadin ku saabsan baaritaanka?

- Fadlan la xariir waaxda kahortaga cudurka qaaxada ee GGD ee deegaankaaga. Waxaad xogta xiriirka ka heli kartaa www.ggd.nl iyo kaarka casuumaada talaalka. GGDs waxay leedahay hanaan lasoo gudbiyo cabashooyinka.
- Waxaad xog dheeraad ah oo ku saabsan cudurka qaaxada ka heli kartaa www.rivm.nl/tuberculose.

This information is available in English at:
Xogtaan oo Soomaali ah waxaa laga heli karaa:
ብቋንቋ ትግርኛ ዝተተርጕመ መልክዕ ናይ'ዚ ሓበሬታ፡ ኣብ'ዚ ዝስዕብ ገጽ ክርከብ ይከኣል፡-
هذه المعلومات متاحة باللغة العربية في هذا الموضع:
این معلومات به زبان دری در اینجا قابل دسترس است:

www.rivm.nl/en/tuberculosis/information-materials

Published by:

National Institute for Public Health and the Environment, RIVM
PO Box 1 | 3720 BA Bilthoven
The Netherlands
www.rivm.nl/en

March 2022

Committed to *health and sustainability*

013622